

Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital ee Allina Health

Guudmarka Barnaamijka Dib-u-habeynta Goobta

Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital ee Allina Health: Ballanqaadkayagu Waa Inanu Hagaajino Gurigayaga ku yaalla Xaafadda Phillips Muddada Dheer ee Soo Socota

Waxay Allina Health qorsheyneysaa mashruuc dhisid oo ah dhawr sannadood oo ah goobta cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital. Mashruucani waxa u naga caawin doonaa in annu wax ka beddelno goobahayaga bukaanka waxana u diyaar nooga dhigi doonaa in annu 50-ka sannadood ee soo socda daryeel ku bixino —xaafaddii noo ahayd guri muddo ah 140 sannadood.

Mashruucani waxa u qayb ka yahay ballanqaadkayaga in annu dib u qeexno daryeelka caafimaadka. Waxa annu ugu magacdarnay Habka Dhammeystiran ee Fiicneynta (Whole Way to Better). Waxa u ku saabsan yahay in maalgalin lagu sameeyo xaafadayada, in wax laga qabto arrimaha waaweyn ee ka jira daryeelka caafimaadk, iyo in la bixiyo daryeel shakshi oo dhammeystiran—jidh ahaan, maskax ahaan, niyad ahaan iyo xidhiidhka lala leeyahay dadka kale.

Ka-hor inta aanaanu fiicneyn cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital, waa in annu dhammeystirno lab jadiidin dhisme oo muhiim ah marka hore:

- Waa in la dhiso Warshad Adeeg oo Dhexe oo cusub (Central Utility Plant) (CUP)
- Waa in la dhiso Goob Gaadiid oo cusub (Ramp 7) oo ah laba heer baarkin oo lagu darayo Sagxadda Baarkinka ee 60aad (Ramp 6)

Horumarradan ayaa taageeri doona dhammaan xerada isbitaalka, oo ay ku jiraan:

- Goobta Cusub ee Qalliinka iyo daryeelka xaaladaha halista



Goobta Qalliinka iyo Daryeelka Halista



Sawirka fikradda goobta cusub ee Qalliinka iyo Daryeekal Halis ah ee 10th Avenue and Andersen Lane

WAA MAXAY: Goobta Qalliinka iyo Daryeelka Halisku waxay bedeli doontaa qolalka qalliinka ee isbitaalka waxayna abuuri doontaa meelo cusub oo lagu daweyyo bukaannada u baahan daryeel muhiim ah.

HALKEE: Dhisme cusub ayaa laga dhisi doonaa bartamaha xarunta Abbott Northwestern Mid ka mida qaybta dhismaha ayaa loo bedeli doona 4 dabaq oo baarkin ah oo hadda ku taal 10.th Avenue.

GOORMA: Mashruucan ayaa la filaya inuu bilaabmo **dabayaqada 2022 ama horaanta 2023**.

SABAB:

- Dhisidda Xarunta daryeelka waxa ay noo ogolaatay in aan ka saarno daryeelka bukaanka qaar ka mid ah dhismayaasha ugu da'da weyn ee ku yaala xeradayada.
- Isbeddelladani waxay noo oggolaanayaan inaan horumarino deegaanka daryeelka bukaannadeena, booqdayaasha, iyo shaqaalaha.
- Isbitaalka Abbott Northwestern wuxuu hadda ku tiirsan yahay qolalka qalliinka ee la dhisay bartamihii 1900-meeyadii, xilligaasi oo tignoolajiyad aad u yar looga faa'iideystay xilligii qalliinnada. Baaxadda qolalkan qalliinka ma qaadi karaan tignoolajiyada qalliinka casriga ah. Xaddidaadahani waxay saameeyaan noocyada habraacyada lagu samayn karo Isbitaalka Abbott Northwestern.
- Meelo cusub oo daryeekal Halis ah ayaa la dhisay si ay u taageeraan baahida korodhay iyo tignoolajiyada mustaqbalka. Wuxuu hadda ku tiirsan yahay qolalka qalliinka ee la dhisay bartamihii 1900-meeyadii, xilligaasi oo tignoolajiyad aad u yar looga faa'iideystay xilligii qalliinnada. Baaxadda qolalkan qalliinka ma qaadi karaan tignoolajiyada qalliinka casriga ah. Xaddidaadahani waxay saameeyaan noocyada habraacyada lagu samayn karo Isbitaalka Abbott Northwestern.
- Isbeddelladani waxay sidoo kale awood u siinayaan beddelka dhismayaal duug ah oo aan tayo lahayn oo leh dhismayaal tamar wanaagsan leh.

Warshadda Adeegga ee Dhexe (Central Utility Plant) (CUP)



Sawir fikradeed ah Warshadda Adeegga ee Dhexe ee ku taalla 26th Street iyo Chicago Avenue

MAXAY: Warshadda Adeegga ee Dhexe waxay beddeli doontaa qalabkii gaboobay ee soo saarista tamarta iyo uumiga ee cisbitaalka kaasoo lagu beddelayo farsamo kaga sii fiican xagga isku-haleyn ta iyo madhxinta tamarta.

HALKEE: Dhisme cusub ayaa laga taagi doonaa Chicago Avenue iyo East 26th Street, kaasoo beddelaya dhismeyaasha Harriet Walker iyo Education.

GOORMA: Wuxuu la filayaa in mashruucani bilaabmo bisha **Abril ee 2021**.

SABABTA:

- Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital waxa u hadda isticmaala qalab la dhigay 1956 si loo soo saaro uumi lagu diiriyo oo lagu qaboojiyo dhismeyaasha, lagu jeermi-dilo 5 milyan oo ah qalab qallin sannad kasta isla markaana lagu diiriyo goobta Carrurta ee Children's Minnesota-Minneapolis. Waxa la gaadhad wakhtigii la jadiidin lahaa qalabkayaga gaboobay.
- Cisbitaalladu waxay u baahan yihiin tamar la isku haleyn karo si loo bixiyadeed degdeegga 24-kii saac/7-dii maalmood kasta, adeegyo qallin iyo adeegyo caafimaad oo kale.
- Cisbitaallada waxa laga rabaa inay isku filnaadaan illaa muddo ah 4 maalmood haddii la waayo koronto. Tani waxay keenaysaa in loo baahdo mishiinada korontada soo saara oo la isku haleyn karo isla markaana leh hawlgal fiican.
- Dheeraad ka baro qaybahu muddo dheer shaqeyn kara ee Warshadda Adeegga ee Dhexe.

Goobta Gaadiidka



Sawir fikradeed ku saabsan Goobta Gaadiidka ee cusub ee Chicago Avenue, ee ku xigta Greenway

MAXAY: Goob Gaadiid oo cusub ayaa baarkin ama meelo baabuurta la dhigto siin doonto bukaanka iyo shaqaalah. Waxay goobtu taageeri doontaa isticmaaleyaasha baasgeelka ama bushkuleetiga iyo isticmaaleyaasha kale ee isticmaala gaadiid aan ahayn baabuur. Waxana ay goobta sii fiicneyn doontaa muuqaalka, dareenka iyo ammaanka marka laga fiiriyo heerka jidka.

- Goobtan cusubi waxay fiicneyn doontaa ammaanka iyo isticmaalka jidka Chicago Avenue iyo barta lugtu marto ee saaran Greenway. Fiicneynta waxa ka mid ah iftiin cusub, goobo xafiis oo ah heerka jidka oo laga kireyn doono ama laga ijaari doono hay'adaha degmada, waxa kale oo ka mid ah dhir iyo geedo, iyo siyaabo isticmaal oo kala duwan oo loogu talogalay isticmaalka mustaqbalka.
- Waxa kale oo mashruucani Goobta Gaadiidka u xadhkaha korontada ee dusha mara galin doonaa dhulka si loo fiicneeyo ammaanka.
- Dusha dhismaha cusub waxa laga hirgalin doonaa beer cadceedeed ay beeshu leedahay.

HALKEE: Goobta Gaadiidku waxay beddeli doontaa xerada baarkinka ee 2837 Chicago Ave ee sagxadda dhulka ku taalla. Wawa kale oo annu dhisi doonaa laba heer oo ah baarkin oo la dul saaro sagxadda baarkinka ee hadda jirta ee ku taalla 2800 10th Ave South.

GOORMA: Wawa la filayaa in mashruucani bilaabmo horaanta gu'ga **2021**.

SABABA:

- Wawa annu u baahan nahay baarkin sii fiican oo loo helo bukaanka dhaafsan 200,000+ ee ka yimaada dhammaan Gobollada Dhexe (Midwest) una yimaada daryeel ay ka helaan cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital sannad kasta. Sidoo kale, shaqaalahayagu waxay u baahan yihiin taageero sii fiican oo laga siiyo hababka socdaalka, sida raacidda baasgeelka.
 - 9,540 oo ah shaqaale Allina Health ayaa ka shaqeeya xaafadda Phillips.
 - 5,810 oo ah shaqaale Allina Health ayaa ka shaqeeya cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital.
 - 3,187 oo ah shaqaale Allina Health ayaa ka shaqeeya dhismaha Midtown Commons.
- Goobta Gaadiidka ee cusub ayaa yareyn doonta sixmadda ama cidhiidhiga xagga gaadiidka ee xaafadda marka baabuurta la dhigto meel ka baxsan wadooyinka.
- Mashruucu wuxu qayb ka yahay tabtayada ah in yareeyo isticmaalka baabuurta u raaco hal qof si qofkaasi u socdaalo. Dheeraad ka baro barnaamijka casriyeenta leh ee Allina Health ee lagu yareynayo tiradayada baabuurta u raaco hal qof.
- Goobta Gaadiidku waxay noo oggolaan doontaa in annu mustaqbalka sameyno jadiidin isla markaana ku eekaano bedka ama aaggaa hadda annu ku jirno. Marka la furo Goobta Gaadiidka ee cusub, waxa annu qorsheynaynaa in isbeddel lagu sameeyo isticmaalka goobta hadda ah Sagxadda Baarkinka ee 1-aad (Ramp 1).

Isgaadhsiin Furan Waa Muhiim



612-262-1010



barta internetka ee mashruuca



@ANWUpdates

Wawa annu u heelan nahay in annu warka kula socodsiino. Dib u soo laabo si ad u heshid warka cusub ee ku saabsan mashruucan.

Wixii ah su'aalo, walaacyo ama fikrado, soo wac khadka teleefonka ee horumarinta goobta Allina Health: 612-262-1010.

Nagala soco Twitter [@ANWUpdates](#).